City of Boston
Inspectional Services

# DHACDOOYINKA DAARADA DAMBE
# TILMAAMAHA IYO ILAHA

**Iaticmaalka dhismayaasha:**
Martigelinta xafladaha daarada dambe ***oo bilaash ah*** waxay keeni doonaan ku xad gudubka ogaysiisyada iyo/ama ganaaxyada la xidhiidha isticmaalka aan saxda ahayn ee meesha dadku degen yihiin. Intaa waxa dheer, dhacdadaada waxaa xidhi kara Waaxaha Magaalada sida Booliska Boston, Dabka Boston iyo/ama Adeegyada Baadhitaanka.

Haddii aad ka fekerayso marti gelinta dhacdada oo aad qabto su'aalo ku saabsan isticmaalka la oggol yahay ee dhismahaaga, fadlan soo wac Adeegyada baadhida lambarka 617-635-5300 ama iimayl u soo dir isd@boston.gov hagitaanka dheeraadka ah.

**Taandhooyinka**
Ka dhisida taandhooyin daarada dambe waxay u baahan kartaa oggolaanshaha iyaddoo ku xidhan inta ay leegtahay. Hagitaanka dheeraadka ah waxaa laga heli karaa halkan: Shuruudaha iyo Nidaamka Ganacsiga ee Soo saarida Oggolaanshaha Taandhada

Si loogu daro sifooyin dibada ah oo dhowr ah h(sida geerashka, barxad, berkad, balbalo ama waab, iwm.) mulkiilaha gurigu waxa uu u baahan karaa inuu soo saro oggolaanshe. Macluumaadka dheeraadka ah, fadlan booqo Sida loo helo oggolaanshaha isticmaalka dhismayaasha | Boston.gov

**Iibka cuntadda/cabitaanka**
Dhammaan dhacdooyinka gaarka magaalada oo dhan waa inay soo maraan Xafiiska Dhacdooyinka gaarka ah xaga Hoolka Magaalada si loo helo dhammaan ruqsadaha oggolaanshaha habboon ee ka soo baxa dhammaan Waaxaha Magaalada. Iibinta cuntadda TCS (cuntooyinka xumaan kara, hilibka, digaaga, bariiska, iwm.) iyo cabitaanka loo diyaariyay dadka degen guriga lama oggola. Sidii beddel ahaan, dadka degen waxay:

1. La xidhiidhaan ganacsiga cuntadda ruqsada haysta si uu cunto u diyaaro oo uu uga soo diro makhaayad ruqsad haysata.

2. La xidhiidhaan baabuurka cuntadda ruqsada haysta xaga meeshaada dhacdada.

Aan ahayn-TCS (cuntooyinka aan xumaan) ganacsi ahaan cuntooyinka hore loo baakadeeyay (soodhaha, jibista, buskudka) uma baahna Oggolaanshaha Caafimaadka. Xad gudubyadan waxay keeni karaan tallaabooyinka kale ee maamulka. Si loo barto wax badan oo ku saabsan sharciga adeegyada cuntadda iyo xeerarka, fadlan booqo Waaxda Caafimaadka | Boston.gov.

**Cabashooyink Buuqa**
Xeerka buuqa Magaalada Boston waxa uu ka dhigayaa sharci daro in la dhibo nabada iyaddoo buuqa la oggolaanayo inuu xad dhaaf noqdo. Ishu waxay ka iman kartaa waxyaabaha sida sameecadaha, qalabka ama codka guud ee ka soo baxaya isku imaanshaha dibada ah. Fadlan ixtiraam u muuji jaarka marka la martigelinayo isku imaanshaha gudaha iyo dibada gurigaaga. **Xeerka Magaaladu waxa uu awood u siinayaa buuqu nuu joogsado laga bilaabo 11:00 Habeenimo ilaa 7:00 Subaxnimo.** Buuqa waa inuu ahaadaa heerar la aqbali karo muddada saacadaha la oggol yahay ee xeerka.

Haddii aad qabto sababo aad ku rumaysato xeerka buuqa in lagu xad gudbayo, fadlan isticmaal adeegyada magaalada ee soo socda si cabasho loo sameeyo:

> **Soo wac 311** (617-635-4500) - cabashadu waxaa la gelin doonaa nidaamka si loola socdo. Cabashooyinka badan ee dhismaha waa loo calaamadin karaa Kooxdayada Heeganka ee Dhibta Dhismayaasha.

**Soo wac 911** - Xaaladaha qaarkood, buuqa waxa uu noqon karaa mid aad u xad dhaaf ah waxaad u baahan doontaa inaad soo wacdo Waaxda Booliska Boston (BPD).. Fadlan ogow in xaalado badan, BPD waxay ka jawaabi doonaan xaaladaha badbaadada nolosha oo ma arki kartid jawaabaha degdega ah ee cabashada buuqa. Ku niyad samow in marka dalacaada wacida iyo jawaabaha ee gurmadyadu hoos u dhacaan, BPD waxay baadhi doonaan codka cabashada.